

Dhibaateynta Galmada waa nooc ka mid ah takoorka sharci darrada oo xadgudub ku ah Washington State Law Against Discrimination (Sharci Gobalka Washington ee Lidka Ku ah Takoorka), RCW (Revised Code of Washington, Xeerka Sharciyada Jooftada ah ee Washington) 49.60, iyo Title VII of the Civil Rights Act of 1964 (Qodobka VII ee Sharci Xuquuqaha Madaniga ah ee 1964).

Waa sharci darro in loo-shaqeeyaha uu kula kaco shaqaale ficilo galmo, faalooyin iyo dhaqan aan la jecleysanin marka qirashada dhaqanka noocaas ah looga dhigo qodob ama shuruud qarsoon ama cad shaqaaleyiinta ama loo adeegsado in lagu saleeyo go'aamada shaqaaleysiinta, ama marka dhaqanka noocaas ah lala damacsan yahay ama loola jeedo faragalin aan sabab lahayn oo lagu sameeyo shaqa gudashada qofka, ama sameynta jawi shaqa oo cabsigelin leh, cadaawad leh ama caro leh.



Tusalaha Dhibaateynta Galmada:

- Kormeere ayaa u sheegaya qof shaqaale ah si uu shaqaale u sii ahaado ama dalacsiin u muteysto, qofka shaqaalaha ah waa inuu waa inuu u fuliyo baahiyaha galmo ee kormeeraha.
- Qof shaqaalaha ah ayaa si joofta ah uga faalooda muuqaalka qof kale oo la shaqeeya wuxuuna ka codsadaa inuu balan shukaansi la yeesho, inkasta oo faalooyinka aan la jecleysanin wax xiisa ahna loo qabin balan shukaansi.
- Kaliyenti si joofta ah u soo booqda goobta ganacsiga ee loo-shaqeeyaha ayaa kaftan dhaqan galmo leh ku kaftama, la haasaawo shaqaalaha, faalooyin galmo ka bixiya ama adeegsada erayo liidmo ah marka uu ula jeedo jinsi gaar ah.

Dhibaateynta waxaa ka mid noqon kara balse aan ku koobnayn:

- Kaftanka, faalooyinka, ama baaqyada aan la jecleysanin.
- Erayada carada leh ama hanjabaada ah.
- Sawirada iyo muuqaalada lagu soo badhigo deegaanka shaqada, dharka, lagu diro iimayl ama baraha kale ee bulshada.
- Taabshada aan la jecleysanin, taabshada jireed ama hanjabaadaha, sida qabashada, dharbaaxada, tuuurida, qanjaruufada, ama faragelinta madaxbanaan dhaqdhaqaaqa ee qofka.
- Codsiyada kulamada shukaansiga iyo haasaawaha aan la jecleysanin.
- Faalooyinka ama luuqada liidmada ah ee lidka ku ah hal jinsi gaar ah.



Qoddobada Ay Tahay in La Xusuusto:

Dhibaateynta galmada waxay ka dhex dhici kartaa dadka isku jinsiga ah, raga ayaa noqon kara dhibanayaasha dhibaateynta galmada; haweenkana waxay noqon karaan kuwa wax dhibaateynaya. Dhibanayaasha dhibaateynta galmada waxaa ka mid noqon kara qolo saddexaad oo u beylah noqoto dhibaateyn lala damacsanaa qof kale. Dadka dhibka geysanaya waxay noqon karaan kuwa aad isla shaqeysaan, kormeerayaasha, loo-shaqeeyayaasha, ama xittaa dadka aan shaqaalaha ahayn, sida macaamiisha, qaandaraaslayaasha, kaliyentiyaada ama iibiyayaasha.

Loo-shaqeeyayaasha

Loo-shaqeeyayaasha waxay ma'uul ka yihiin inay ka hortagaan oo saxaan dhibaateynta. Loo-shaqeeyayaasha waxay mas'uul ka yihiin inay la yimaadaan siyaasadaha kahortagga dhibaateynta iyo habraacyada soo wargelinta. Loo-shaqeeyayaasha waa inay baaraan dacwadaha oo ay qaadaan tallaabo degdeg ah oo sidx ah si loo joojiyo dhibaateynta, xittaa marki uu sameeyo qof aan shaqaale ahayn. Dhaqamada shaqada ee ugu wanaagsan waxaa ka mid ah tababarida shaqaalaha si loo abuuru jawi dhiibaato aan lahayn, loo hagajajiyo wadooyin dacwada la soo mariyo, iyo hubinta in shaqaalaha ay ka warqabaan habraacyada soo wargelinta.



Shaqaalaha waxaa mas'uuliyad ka saaran inay iska ilaaliyaan ku lug yeelashada dhibaateyn iyo inay isticmaalaan habraacyada dacwada ee loo-shaqeeyahaaga si ay u soo wargeliyaan dhibateynta. Haddii aad rumeysan tahay in dhibaateyn laguugula kacay, u sheeg qofka ku dhibaateenaya inaad dhaqanka jecleysanin oo uu joojiyo isla markaaba; dukumiinti ka diyaari dhacdada; ku wargeli dhaqanka maamulaha ama kormeeraha ku habboon, isticmaal habraacyada dacwada ee loo-shaqeeyahaaga; oo kala shaqee baaritaanka loo-shaqeeyaha uu sameenayo.

**Maxkamadda Sare ee Mareykanka waxay
aqoonsatay laba nooc oo ah
Dhibaateynta Galmada**

1. “Quid pro Quo” (Micnaha Latin ahaan “isii aan ku siiyo”) waxaa lagu qeexaa dhaqan galmo oo aan la jecleysanin kaas oo codsi dhiibashada si maldahan iyo si cad ba laga dhigo qodob ama shuruud shaqaalaysiin, ama loo adeegsado in lagu saleeyo go'aanada shaqaaleysiinta.

2. Deegaan Shaqo oo Cadaawad leh wuxuu ka dhashaa Dhibaateynta Daran ama Baahsan; Qof Macquul ah ma awoodi doono inuu ku shaqeeyo deegaankan dhibaateynta aawadeed.



Hannaanka Dacwada

Qof kasta waxaa waajib ka saaran inuu u hoggaansamo sharciga wuxuuna xaq u leeyahay inuu xaalmarin raadsado marka uu dhib dhaco.

Dacwadaha xadgudubyada RCW 49.60 waa in lagu soo gudbiyo lix bilood gudahooda taariikhda uu dhibka dhacay, marka laga reebo kiiska takoorka uurka, kuwaas oo ay tahay in lagu soo gudbiyo hal sano gudahiisa; guryaha, dacwada waa in lagu soo gudbiyo hal sano gudihiis; iyo dacwadaha war faafiyaha shaqaalaha, oo lagu soo gudbiyo labo sano gudahooda. Dacwadaha ayaa la xalin karaa inta lagu jiro baaritaanka iyada oo ku xiran heshiis dhax mara kooxaha is haya iyo WSHRC (Washington State Human Rights Commission, Guddiga Xuquuqaha Aadanaha ee Gobalka Washington).

**Goobaha Guddiga Xuquuqaha Aadanaha ee
Gobalka Washington**

XARUMAHA WAAWAYN

711 S. Capitol Way, Suite 402
P.O. Box 42490
Olympia, Washington 98504-2490
360-753-6770

SPOKANE

Rock Pointe Plaza III
1330 N. Washington Street, Ste 2460
Spokane, Washington 99201

YAKIMA

1205 Ahtanum Ridge Dr., Suite C
Union Gap, WA 98903

WENATCHEE

519 Grant Rd
East Wenatchee, WA 98802



**WASHINGTON STATE
HUMAN RIGHTS COMMISSION**
It's Not Justice If It's Not Equal

Haddii aad u baahan tahay macluumaad dheerad ah, aad qabto su'aalo dheeraad ah, ama aad rabto inaad tababar u qabato hay'adaada, fadlan kala xiriir WSHRC lambarka 360-753-6770 ama 800-233-3247. Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan midan iyo arrimaha kale ee xuquuqaha madaniga ah waxaa laga heli kaa boggeena intarmetka ee barta

www.hum.wa.gov

**Guddiga Xuquuqaha Aadanaha
ee Gobalka Washington**



**KA HORTAGGA
DHIBAATEYNTA
GALMADA**

*Himilada Guddiga Xuquuqaha Aadanaha ee
Gobalka Washington waa inuu ka hortaggo oo
uu suuliyo takoorka iyada oo loo marayo
adeegsiga sharciga ee cadaalada ah,
isticmaalka kheyraadka ee hufan, iyo gacansaar
la yeelashada bulshada ee waxtarka leh.*